

Mir yar: Shekadii Wangari Mathay



Barnebokker for Norge

barnebokker.no

Mir yar: Shekadii Wangari Mathay

Skrevet av: Nicola Rijdsdijk

Illustrert av: Maya Marshak

Oversatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebokker for Norge (barnebokker.no), som tilbyr barnebokker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no>



✎ Nicola Rijdsdijk
📧 Maya Marshak
📖 Anwar Mohamed Dirie
🗣️ somali
📖 niva 3





Tuulo ku taal dhinaca hooseyo buurta
Kenya ee Bariga Afrika, gabar yar ayaa
hooyadeed kala shaqeyn jirtay beeraha.
Magaceedu waxa uu ahaa Wangari.



Wangari bannaanka ayay aad u jeclaan
jirtay. Baangad ayay ku qodqodday
carrada beerta qoyskooda. Waxayna
dhulka gandacsan ku aastay miro aad u
yaryar.



Watigay ugu jeclayd maalinta waxa uu ahaa marka ay cadceeddu dhacdo. Marka ay mugdi saaid u noqoto aragtida dhirta, Wangari waxay ogaataa in ay tahay xilligii ay guriga aadi lahayd. Waxayna qaadaa waddoyin dhuudhuuban oo dhex maro beeraha, ayadoo gudbeyso webi yaal markay baxdo.


Wangari waxa ay dhimatay 2011, laakiin waa aannu xusuusannaa mar walba oo aan aragno geed qurux badan.



Wangari si adag ayay u shaqaysay. Dadka duniida oo dhan ayaa ogaaday, waxaa na la siiyey abaalmarin caan ah. Waxa la yiraahdaa Abaalmarinta Nabada ee Nobel, waxa ayna noqotay haweeneyda ugu horeysay ee kafigeed Afrika laga siiyey abid.



Wangari waxa ay ahayd ilma fariid ah wayna sugi la eyd in ay iskuul aado. Laakiin hooyadeed iyo aabbahood waxa ay doonayeen in ay jooqto oo ay guriga ka caawiso. Markii ay toddoba jirsatay, walaalkood ka weyn ayaa ku qalqaaliyey waalidkeed in ay u oggolaadaan in ay iskuul aaddo.



Way jeclayd in ay wax barato! Wangari waxay wax ka baratay in badan oo badan buug walbey aqrisay. Iskuulka oo ay aad ugu wanaagsanaatey darteed waxaa lagu casuumay in ay wax ku barato dalka Maraykanka. Wangari waa ay faraxday! Waxa ay doonaysay in ay wax badan ka ogaato dunida.



Waxuu waqti gudbo ba, dhirtii cusbeyd waxa ay noqotay kayn, webiyadiina mar kale ayay biyo keeneen. Farriintii Wangari, Afrika ayay ku faaftay. Maanta, malaayiin geedo ah ayaa ka soo baxay mirihii Wangari.

Wangari wax badan oo cusub ayay ku baratay jaamacada maraykanka. Waxa ay baratay dhirta iyo sida ay u baxaan. Waxa ayna xusuusatay sidii ay usoo kortay: la ciyaarki walaaladeed hooska geedaha kaymihii qurxoonaa ee Kenya.



Wangari way garanystay waxa ay tahay in la sameeyo. Waxa ay bartay haweenkii sida dhirta miro looga abuurro. Haweenku dhirta ayay sii iibin jireen lacagta ka soo baxdana waxay u isticmaali jireen in ay goysaskooda ku daryeelaan. Haweenkii waxa ay noqdeen kuwo faraxsan. Wangari ayaa ka caawisay in ay dareemaan awooddooda iyo xoog.





Markii ay wax sii barataba, waxa ay sii ogaanaysay in ay dadka Kenya aad u jeceshahay. Waxa ay doonaysay in ay noqdaan kuwo faraxsan oo xor ah. Markii ay wax sii barataba, waxa ay soo xusuusan jirtay gurigeedii Afrika.



Markii ay wax barashadeedii dhammeysatay, waxa ay ku noqotay Kenya. Laakiin wadankeedii waa is beddelay. Beero baaxad leh ayaa is daba jiidnaa dalki. Haweenku ma heysan xaabo ay wax ku karsadaan. Dadku fakhri ayay ahaayeen, carruurtuna waa ay gaajeysnaayeen.